

Waa maxay urur/naadi?

Ururu sida caadiga aha waa dad isu tagay, dadkan oo xiiseeya wax isku mid ah. Waxyaabahan ay xiisaynayaan waxay noqon karaan.

Inkastoo ururku sida caadiga ah, uu ka kooban yahay dad isku wax xiiseeyo, haddan ururku ma hor istaagi karo, cida xiisaynaysa inay xubin ka noqoto. Deenmaark waxaa shuruud ah, in urur walbaa uu u furan yahay cid walba oo xiisaynaysa inay xubin ka noqoto. Waajib kuma aha ururka in qof walbaa uu nashaad helo. Guddoonka ururka ayaa go'aaminaya, nashaadaadka ururka uu qabanayo, goorta iyo cida ka qayb qaadanaysa nashaadkan.


Guddoonka

Guddoonka ururka waxaa lagu doortaa shir guud oo la qabto. Shirka guud waa in la qabtaa ugu yaran, sannadkii hal ma, xubnahana waxay xaq u leeyihiin, inay u codeeyaan cida gudoon noqonaysa.

Gudoonku wuxuu qabsadaa shirar, ay ku go'aaminayaan, shaqada uu qbanayo ururka. Tusaale ahaan, nooca nashaadada uu qabanayo xili walba, waxyaabihii iyo meelihii la isticmaali lahaa, siddo kale waa inay ilaaliyaan, fulinta waxyaabihii la isku raacay.

Xubnaha

Xubnaha waxay bixiyaan lacag bileed, lacagtan tusaale ahaan waxaa lagu isticmaalaa guriga, nalka/kulaylka, ala-abooyinka, koorsooyinka, tartanada la qabto iwm. Si aysan u badanaan lacagta bisha la bixiyo, xubnaha ayaa si tadawuc ah ooga shaqeeya ururka. Tusaale ahaan, inay ka shaqeeyaan siddii loo qaban lahaa kulamad la isugu yimaado, iyo inay ka qayb qaataan diyaarinta tartanada uu qbanayo ururka. Waxyaabaha ay ka caawiyaan. Waalidiinti siddoo kale waxay caruurta geeyaan meesha lagu qabanayo tartanka.





Ururka waxaa uu raadiyaa, inuu helo tababare iyo meelihii lagu qaban lahaa nashaadyada kala duwan, si xubnahu u helaan meel ay ku cayaaraan isboortiga.

Fraqiga u dhaxeeya ururada iyo shirkadaha khaaska ah

Halkaas waxaa jira farqi u dhaxeeya ururada iyo shirkadaha khaaska ah. Ururka waxaad xubin ka tahay wax guud, oo aad la wadagto xubnaha kale, waxaana lagaa rabaa inaad

bixiso lacag bile ah. Dhaqaalaha dheeradka ah, waxaa loo isticmaalaa maamulka ururka shaqada ururka waxay ku salaysan tahay mabda' iskaa wax uqabashada. Siddaa daraadeed, waxaa lagaa sugayaa inaad ka qayb qaadato shaqada ururka, marka ay suurtagal kuu noqoto inaad qabato shaqadan. Meelaha jimcsiga oo kale (fitnesscentres-ka),

waa meelo shirkada khaas ah leeyihiin, oo lacag laga sameeyo. Tanina waxay ka mid tahay farqiga u dhaxeeya shirkadaha khaaska ah iyo ururada, waayo ururudu waxay taakulayn ka helaan kamuunka iyo sanduuqyada caawiya ururada isboortiga.

Ururka iyo kamuunka

Marka koox dad ah, ay doonaaninay samaystaan urur, waa inay caddeeyaan ujeeddada ururka. Si ururka uu ogolaansho u helana, waa in ujeeddadiisu tahay, mid ay ka muuqato, kor u qaadida wacyiga bulshada. Kamuunka ayaa u xilsaaran ogolaanshaha ururka, kamuunkana siddoo kale wuu la soconayaa ururada uu ogolaaday oo dhan.

Xiriirka:



Kamuunka: _____

DGI Iskudhafka: _____

Guddoomiyaha: _____

Tababaraha: _____

Kuwa kale: _____

Hab dhaqanka ururada daanishka

Ururadu waxay qaybwayn ka yihiin dhaqanka daanishka. Deenmaarka waxaa ka jira in ka badan 1 milyan oo ururo ah. Sddaa daraadeed, waxaa hubaal ah, in kamuunahaaga ay ka ururo badan, oo kal duwa Dadka daanishka ah badankooda, waxay qayb ka noqdaan urur ama ururo badan.

Sababta aan ugu faraxsan nahay ururada waxay tahay

- Ururada waxaa ka samaysanaa macaarif iyo asxaab cusub
- Ururada waxaa suurtagal noo noqota, inaan wada hadalo, wax is dhaafsano oo kulano wada samaysano ku salaysan rabitaankaayaga.
- Ururada waxaan ku baranaa assaaska demuqraadiyada aan haysano.
- Ururuada waxaan ku baranaa is ixtiraamka, iyo hab dhaqameedka iyo qiyamka bulshada ee kala duwan.
- Ururada waxay suuragalisa, in xubnaha ay raad ku yeeshaan doorashada, waxyaabaha raadku ku yeelanaya bulshadooda.
- Ururada waxay noo suurtagalinayaa, inaan ciyaaro nooca isboortiga aan xiisaynayno, oo la ciyaaro dadka kale ee aan isku waxa xiisayno.